



Macluumaadkii u Dambeeyey ee Isqoritaanka iyo Isku-miisaamidda Barnaamijka

Qoysaska PPS ee Sharafta Leh,

Waxa aanu doonaynaa in aanu idinku wargelino macluumaadka u dambeeya ee horumarkayaga mashruuca Is-qoritaanka & Barnaamijka isku-miisaamidda ee aanu bilawnay. Sidii aanu hore u shaacinay, shaqadayada bilaabitaanku waxa ay diiradda saaraysaa dugsiyada ku yaalla Koonfur-bari Portland kahor dib u furitaanka Dugsiga Dhexe ee Kellogg.

Isbahaysiga Hagitaanka Koonfur-bari waxa uu qabtay saddex shir bishan (oo dhammaantood onlayn ah safmarka awgii) kuwaas oo diiradda lagu saaray ujeedsiga dhanka walxaha iyo xogta. Waxa ay ku soo gebagabeeyeen toddobaadkii hore iyaga oo soo bandhigay qabyo-qoraalkii soojeedinta ee ugu horreeyey, ee sidoo kale loo yaqaano looxa isbiriinka ah ee laga boodo. Meelaha diiradda la saarayo ee muhiimka ah ee soojeedinta:

- Waxa dib loo furi doonaa Dugsiga Dhexe ee Kellogg, iyada oo barnaamijka Isdhex-gelinta Labada Luuqadood ee Isbaanishka ee hadda ka jira Dugsiga Dhexe ee Mt. Tabor uu u wareegayo halkaas.
- Harrison Park, oo imika ahaan ah dugsi K-8, waxa uu noqon doonaa dugsi dhexe.
- Dugsiyada K-8 ee kale (Arleta, Bridger, Creston, Lent and Marysville) waxa loo beddeli doonaa dugsiyo K-5 ah.

Qaababka, xadadka iyo xilliyada quudiyaha barnaamijyada DLI ayaa sidoo kale la soo jeediyey. Faahfaahinta waxa laga arki karaa [dhukumentiga qabyo-qoraalka ugu horreeya](#). *Tani waa bar bilawga ikhtiyaaro macquul ah oo is-bahaysiga Hagitaanka Koonfur-bari ay tahay in ay ka fekeraan, waxana ay sii wadi doonaan in ay ka wada shaqeeyaan Oktoobar in ay su'aalo ka weydiiyaan oo ay ka sameeyaan noocyo dheeraad ah qorshe macquul ah.*

[Isbahaysiga Hagitaanka](#) waxa uu ka kooban yahay waalidiinta iyo maamulada metalaya dugsiyada Koonfur-bari. Laga bilaabo 8 da Oktoobar, shaqadiisu waxa ay u wareegi doontaa Marxaladda 1, shirar sagaal Khamiisood ah oo taxane ah oo diiradda lagu saarayo darajooyinka dugsi dhexe. Taxanaha waxa ku jiri doona guryo furan oo onlayn ah 29 ka Oktoobar iyo 3 da Diisambar kuwaas oo u furnaan doona cid walba, xog ururin bulsho, waxana uu kusoo gebagebayn doonaa talo-bixinta ugu dambeysa ee Marxaladda 1 17 ka Diisambar.

Marxaladda 2 waxa ay diiradda saari doontaa fasallada PK-5, iyada oo la yeelanayo kulano gu'ga 2021.

Isqoritaanka iyo Isku-miisaamidda Barnaamijku waxa uu adeegsadaa habka baadhitaanka ku salaysan xogta iyo macluumaadka bulshada labadaba si loo daboolo baahiyaha sida sinnaanta iyo is-huwanaanta, socdaalka, iyo kuwo badan oo dheeraad ah. Ajandayaasha kulanka, agabka, daqiiqadaha iyo muuqaalada waxa la soo dhigaa [Websaytka Isqoritaanka iyo Isku-miisaamidda Barnaamijka](#).